JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAHA BAARLAMAANKA

REPUBLIC OF SOMALILAND
HOUSE OF PARLIAMENT

Tell: 00 252 2 523220
Tell: 00 252 2 520785

Website: www.guurti.org
Website: www.somalilandhor.org

Address: Main Street, Sha'ab Area, Near Presidential Palace, Parliament Building
Hargeisa, Somaliland.

Ref: GW/G1/22/110/2020 Date: - 31/8/2020

Ku: Madaxweynaha JSL =Hargeysa=
Og: Garyaqaanka Guud Ee Dawladda =Hargeysa=
Og: Xeer-ilaaliyaha Guud Ee Qaranka JSL =Hargeysa=
Og: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ee JSL =Hargeysa=

**Ujeeddoo: Jawaabta Sharci Ee Qaraarka ay Maxkamadda Sare ku laashay Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr24/2020.**

**Mudane Madaxweyne,**

| | |
|---|---|
| ***ANNAGA OO KA DUULAYNA*** | Qodobbada **97aad**, **98aad**, **100aad**, **101aad**, **105aad** iyo Ee Dasuurka Jamhuriyadda Somaliland |
| ***ANNAGA OO MAANKA KU HAYNA*** | Xilka iyo waajibaadka dastuurku u gaar yeelay Hay'adaha Garsoorka gaar ahaan Maxkamadda Sare, |
| ***ANNAGA OO TIX-RAACAYNA*** | Qodobka **76aad** ee dastuurka jamhuuriyadda Somaliland ee jideeyay habka loo raaco xeer-dejinta |
| ***ANNAGA OO GARAWSAN*** | Qodobka **1aad, 3aad, 6aad, 8aad, 37aad** iyo **38aad** Ee Xeerka Waxka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr.24/2020. |
| ***ANNAGA OO TIX-RAACAYNA*** | Qaraarkii Maxkamadda Sare ku laashahay waxka-beddelka iyo kaabista xeerka nidaamka garsoorka ee xeer.Lr.24/2020. |

Waxaanu kuu soo gudbinaynaa jawaabta sharci ee ku aaddan qaraarka summaddiisu tahay **MS/GMS/G-7/419/2020** ee ku taariikhaysan **27/08/2020** ee ka soo baxay Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuuriga ee Jamahuuriyadda Somaliland, isla markaana ay ku laashay **Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Dhaqan-galka ah ee Nidaamka Garsoorka Somaliland (Xeer.Lr.24/2020 ).**

## JAWAABTA QARAARKA MAXKAMADDA

1. Qaraarkan ay Maxkamada Sare ku laashay Xeerkan (Xeer lr 24/2020) waxay u cuskatay cabashada Guddoomiyayaasha Maxkamaddaha Rafcaanada Dalka JSL, ee nuxurkeedu yahay " Cabasho dabaqid la'aan wax ka badelka iyo kaabista xeerka nidaamka Garsoorka xeer Lr.24/2020 ", ee ay maxkamadda sare xustay in ay si qoto dheer u daristay qodobbada uu ka kooban yahay xeerku.

   Sidaa daraadeed, laguma dhisi karo dacwad dastuuri ah oo ay maxkmadda dastuurku qaraarka kaga soo saarto si waafaqsan dastuurka, sida oo kale waxa muuqatay in maxkamadda sare ay ka qaaddaya dacwada ay dhinac ka tahay, taasina waxay ka soo hor jeedaa mabaa'diida guud iyo aas-aaska waaxda garsoorka. (Qofna xaq uma laha in uu ka garnaqo dacwaddiisa sida ku cad Qodobka **29aad** Ee Xeerka Habka Madaniga)

   Maxkamadaha racfaanku waa maxkamado ka mid ah qaab-dhismeedka maxkamadaha dalka sida ku tilaaman qodobka **100aad** Ee Dastuurka, waxayna qayb ka yihiin Hay'adaha Garsoorka (Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta) sida ku xusan qodobka **99aad** Ee Dastuurka.

   Qaraarakani wuxuu si cad u khilaafayaa Qodobka **97aad** faqardihiisa **1aad** iyo **2aad** oo si cad u tilmaamay awoodaha waaxda garsoorka, sidoo kale qaraarkani wuxuu ka soo horjeedaa Qodobka **37aad** ee Waxka-beddelka iyo Kaabitsa Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr..24/2020 oo waajibiyay Awoodaha Maxkamadda Dastuurka, sidoo kale ma waafaqayo Qodobka **38aad** ee isla xeerka oo jideeyay habka loo soo jeedin karo dacwad dastuuri ah.

2. Maxkamaddu waxay tilmaamtay in gal-daloollada ku jira xeerkan oo ay ka mid tahay in isaga oo ah Wax Ka badel Iyo Kaabista Xeer hore u jiray, haddana la siiyay tilmaan iyo sumad (sannad cusub) lagana dhigay xeer cusub kaasi oo ah xeer lr.24/2020, halkii uu ka ahaa xeer lr. 24/2003, haddaba, maaddaama oo Golayaashu leeyihiin hab-raacyo u gaar ah ee la xidhiidha habka xeer-dejinta iyo tix-raac, sidaa darteed ma noqon karto asbaab la xidhiidha nuxurka xeerka oo ay maxkamadda sare ku salayso qaraarkeeda.

3. Sida qaraarka ku xusan, Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL waxay sheegtay in qodobada ku jira xeerkani ay ka hor imanayaan Dastuurka JSL, sida ku cad qodobka **6aad** faqradiisa **2aad** oo siinaya awooddii Garsoorka cid kale kana hor imanaysa qodobka **97aad**, faqradiisa **1aad** ee Dastuurka JSL.

   Qodobka **6aad** faqaraddiisa **2aad** ee Xeerka oo u dhigan sidan, ***Awoooda Garsoorida Dacwadaha waxaa iska leh Garsooreyaasha oo keli ah cid kalena looma wareejin karo, marka laga reebo xafiisyada shareeecada ee haysta***

***ruqsad diiwaangashan oo leh awood leh awood garsoor oo ku eg soo saaridda go'aammo iyo caddaymo loo cuskaday shareecada*.**
nuxurka faqraddani kama hor imanayso Qodobka **97aad** ee Dastuurka oo u dhigan sidan,

a. ***Waxa Qaranku yeelanayaa Waax Garsoor, oo hawsheedu tahay u gar-naqa ka dhaxeeya Dawadda iyo dadka; iyo dadka dhexdooda.***
b. ***Waaxda Garsoorku waxay hawlaheeda u fulinaysaa si Dastuurka waafaqsan, iyada oo ka madax-bannaan waaxyaha kale ee Qaranka*.**

waxa kale oo Maxkamaddu sheegtay in xeerkani ka hor imanayo xeerarka dhaqan-galka ah ee JSL sida xeerka madaniga, xeerka habka madaniga, xeerka ciqaabta guud, xeerka habka ciqaabta, xeerka garsoorka caruurta iyo xeerka shaqaalaha dawladda, sidoo kalena Maxkamadda waxay tilmaamtay in xeerkani macno tiray habsami u socodkii shaqada Garsoorka, nuxurkii erey-bixinta shuruucda ee Garsoorku ku shaqaynayay, taasi oo ay ka mid tahay "Garsoore tababare ah" oo ku xusan qodobka **67aad** iyo in xeerkani gabi ahaanba meesha ka saarayo xeerarkii kale ee dhaqan galka ahaa ee uu Garsoorku ku shaqaynayay, taasi oo ku cad qodobka **96aad.**

Haddaba, maxkamaddu may faah-faahin si loo garto qodobbada uu ka hor imanayo xeerku ee ku jira Xeerarka xeerkani ka hor imanayo marka laga reebo qodobbada ku jira Xeerka Habka Madaniga iyo Xeerka Habka Ciqaabta,

4. Maxkamaddu sidoo kale waxay tilmaamtay in qodobbada dhantaalaya xeerkan uu ka mid ah qodobka **13aad** faqradiisa **3aad**oo jidaynaya in xukunka soo saarista lagu saleeyo xukun hore Maxkamad uga soo baxay oo la mid ah,

   Haddaba, Qodobka **13aad** faqardiisa **3aad** oo u dhigan sidan, Dacwadaha ka baxsan farqadda 1aad ee Qodobkan Garsooraha waxa u bannaan inuu ku go'aan qaato xukun hore oo la nooc ah dacwadan isla markaana uu sababeeeyo hadii dabciga dacwada aan lagu faah-faahin Xeerarka dhaqangalka ah.

   Haddaba, nuxurka faqaraddani waxay xambaarsan tahay hab-raaca garmaqalka dacwadda iyo ku salaynta go'aanka garasooraha in ay u bannaan tahay in uu ku go'aan qaato xukun hore oo la nooc ah dacwaddan isaga oo sababaynaya. Sidaa darteed nuxurka farqaddan kama hor imanayso qodobka maxkamaddu xustay ee ah qodobka **38aad** ee dastuurka.

   Maxkamaddu waxay sidoo kale sheegatay in qodobkaasi uu khilaafsan yahay qodobka **38aad**, faqraddiisa **1aad** oo sheegaysa in awoodda xeer-dejinta JSL ay gaar u tahay Baarlamaanka oo ka kooban laba gole oo kala ah Wakiilada iyo Guurtida.

5. Maxkamaddu waxay tilmaamtay in qodobka **28aad** Ee Xeerku jaangoynayo tirada garsoorayaasha Maxkamadda Sare, oo sida Maxkamaddu xustay sheegtay in uu ka hor imanayo qodobbada **101aad iyo 105aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

   Shuruudaha qodobkani jidaynayo kama hor imanayo qodobka **105aad** ee dastuurka, guud ahaan shuruudaha xeerku waxay waafaqayaan dastuurka.

6. Maxkamaddu waxay qodobka **31aad** faqraddiisa **4aad**, oo u dhigan sidan ***Maxkamadda Sare waxa ay yeelan kartaa La-taliyeyaal iyo khabiirro hadba intii loo baahdo oo uu magacaabistooda soo jeediyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddida Cadaaladduna ansixiso***.

   Maaddaama oo guddida cadaaladdu tahay hay'adda maamul ahaan u sarraysa garsoorka, sidaa darteed guddidu waxay awood maamul u leedahay in ay magacawdo la-taliyayaal iyo khabiirro ku shaqaynaya awoodda ay siisay guddida caddaaladdu.

***7.*** Qodobka **35aad** oo Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Sare gaar ahaan faqarddiisa **13aad iyo 14aad.**

   Maxkamaddu waxay tilmaamtay in uu ka hor imanayo qodobka **97aad** ee dastuurka, haddaba maaddaama oo isla xisaabtanka iyo isu-dheellitirka hay'adaha qaranku uu yahay mabda'a dastuuri ah, sidaa daraaddeed ma muuqato nuxur tilmaamaya in qodobku ka hor imanayo dastuurka, gaar ahaan qodobka **97aad.**

***8.*** Maxkamaddu waxay xustay in qodobbada **85aad iyo 87aad** ee Xeerku ay ka hor imanayaan qodobbada **214aad, 248aad** ee xeerka habka ciqaabta iyo **223aad** Ee Xeerka Habka Madaniga,

   Sidaa darteed, maadaama oo ay qodobbada maxkmaddu xustay ay tilmaayayaan hab-raacyada xeerku khilaafayaan xeerka habka madaniga iyo xeerka habka ciqaabta, haddaba mab'da ahaan haddii laba xeer is khilaafaan waxaa la raacayaa xeerka danbe, sidaa daraadeed nuxurka qodobkani kama hor imanayo qodob dastuuri ah.

   Qararaarka ay maxkamaddu soo saaratay, ee ay u cuskatay asbaabaha kor ku xusan ma aha mid xeerka waafaqsan, isla markaana ma sugna dhismaha dawcad dastuuri ah oo u dhaxaysa laba dhinac oo isku khilaafsan nuxurka Xeerka Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Ee Xeer.Lr/24/2020.

   Maxkamadda dastuuriga ah waxay ku aas-aasmaysaa si waafaqsan Qodobka **36aad** ee Waxka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr.24/2020, oo u dhigan sidani:-

1. Dhegeysiga murannada ku saabsan waafaqsanaan la'aanta Dastuurka ee xeer dhaqan-galay ama qodob xeer oo dhaqan-gal ah, amaba fal xukuumadeed;
2. Macnaynta iyo fasiraadda Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, marka laysku qabto nuxurka ujeeddadooda ama ay muuqato is khilaafsanaantoodu;
3. Fasiraadda iyo tirtiridda xukunnada garsoorka ee dhaqan-galay ee khilaafsan Dastuurka, Shareecada Islaamka ama xeerarka dalka;

Hadaba, Qaraarkan ay Maxkamadda Sare soo saartay wuxuu ka hor imanayaa awoodaha Maxkamadda Dastuuriga ah ee ku tilaamaman qodobkan **36aad** ee sare ku xusan, mana kala caddaynayo cida soo saartay oo ay kuwada xusan yihiin qaraarka Makamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuuriga ahi.

Sidaa darteed, qaraarka ay Maxkamadda Sare soo saartay ma laha aas-aas sharci mana waafaqsana Xeerkan iyo Dastuurka JSL.

Gebagabadii, Maxkamadda Sare oo la socoto Maxkamada Dastuuriga ahi waxay si toos ah uga tallaabsatay awoodaha sharci ee qodobbada **36aad**, **37aad** iyo **38aad** ee ku tiilmaaman Xeerka Waxka-beddelka iyo Kaabista Nidaamka Garsoorka Xeer.Lr.24/2020

Maxkamada Sare waxay sidoo kale jebisay qodobbada **97aad** faqaraddiisa **2aad** iyo **98aad** faqradda **1aad** Xarafka J Ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Maxkamadda Sare iyo Maxkmadda Dastuurku waxay sidoo kale laashay mabaa'diida iyo hannaanka nidaamka garsoorka ee ku dhisnaa Wax ka badelka iyo kaabista Xeer dhaqangalka ah Xeer Lr 24/2020 oo ay laashay, sidaa awgeed waxaannu u soo jeedinaynaa in ay la noqoto qaraarkeedan Dastuur jebinta ah.

**ALLA MAHAD LEH**

**WAXAA SI WADA JIR AH U SAXEEXAY**

**Md. Baashe Maxamed Faarax** — **Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

**Md. Siciid Jaamac Cali** — **Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ahna K/S Guddoomiyaha Golaha Guurtida JSL**